

Waalidka qaaliga ah ama Masuulka:

Ilmahaagu waxa uu ka qaybqaatay mid ka mid ah Qiimaynta Dhamaystiran ee Minnesota (MCA-III) ama imtixaanada Minnesota ee Xirfadaha Waxbarashada (MTAS-III) gu'gii hore. Ardayda fasalada 3 ilaa 8 iyo dugsiga sare waxay dhamaystireen MCA ama MTAS ee akhriska, xisaabta, iyo/ama sayniska. Kuwani waa imtixaano gobolka oo dhan ah oo caawiya degmooyinka iyo sharci-dejiyeyaasha inay si wanaagsan u fahmaan halka ardaydu ka joogaan waxbarashadooda iyo inay gacan ka geystaan hagidda dadaallada soo kabashada cilmiyeed ee COVID-19. Xaqiijinta in arday kastaa helo waxbarid iyo waxbarasho tayo sare leh waa mudnaanta SLP sida ay uga go'an tahay in la abuuro bulsho waxbarasho oo heer caalami ah.

Warbixinta Ardayga Gaarka ah ee cunugaada ayaa ku lifaaqan. Warbixintu waxay ku siinaysaa buundada guud ee ilmahaaga iyo heerka guulaysiga imtixaanka ee maaddo kasta, iyo sidoo kale celceliska gobolka, degmada, iyo dugsiga. Heerarka guulaha ee Buuxiyo Heerarka ama Kor u dhaafo Heerarka waxaa loo tixgaliyaa inay "leeyihiin aqoon fiican" oo kusaabsan ujeedooyinka la xisaabtanka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fahamka Warbixinta Ardayga Gaarka ah ee cunugaada ayaa laga heli karaa <http://minnesota.pearsonaccessnext.com/isr/> ama dukumeentigan: "[Maxay Qoysasku u Baahan Yihiin Inay Ka Ogaadaan Isticmaalka Natiijooyinka MCA iyo MTAS.](#)"

Intii lagu jiray sannad-dugsiyeedka 2020-21, ardayda iyo qoysasku waxay la kulmeen isbeddello badan oo qaabab waxbarasho ah, sababo la xiriira aafada COVID-19, kaas oo saameeyay waxbarashada, barida iyo horumarinta shucuurta-bulshada si gaar ah arday kasta. Tani waa muhiim inaad maskaxda ku hayso markaad gaarto guga 2021 MCA/MTAS ee natiijooyinka ilmahaaga. Natiijo ahaan, qiimaynta fasalka ayaa inta badan la isticmaalay sannadkii hore si loo cabbiro guusha ubadkaaga ee Dugsiyada Spring Lake Park.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Qiimaynta Dhamaystiran ee Minnesota iyo imtixaanada kale ee gobolka, waxaad booqan kartaa Waaxda Waxbarashada Minnesota website-kooda oo ah <https://education.mn.gov/MDE/fam/tests/index.htm>.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan MCA-yada, MTAS, ama qiimayn kasta oo aanu u isticmaalno dugsiyadeena, fadlan ilaga soo xidhiidh ([kstewa@district16.org](mailto:kstewa@district16.org)), macalinka ama la taliyaha ilmahaaga, ama maamulaha dugsiga.

Si daacad ah,

Kelly Stewart  
Iskuduwaha Falanqaynta iyo Qiimaynta Waxbarashada  
Dugsiyada Spring Lake Park